



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

QARAAR GOLAHA SHACABKA

KU SAABSAN

KALSOONI KALA NOQOSHADA XUKUUMADDA
RA'IISAL WASAARASE M.NE CABDIWELI SH.
AXMED MAXAMED

Muqdisho, 6^{da} Diseembar 2014

GOLAHA SHACABKA:

Markuu Arkey:

Soojeedinta (mooshin) ka dhan ah Xukuumadda Federaalka Soomaaliya oo ay soo gudbiyeen 138 Xildhibaan oo Guddoonka Golaha soo gaaray 6-dii Nofeembar 2014;

Markuu Arkey:

Qodobka 69-aad Faqradda 2-aad Xarafka (e) ee Dastuurka sida ku-meel-gaar ah loo ansixiyey iyo Qodobka 75-aad Faqradihiisa 1-aad, 2-aad iyo 3-aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka;

Asaga oo ku Kulansan: Kalfadhiga 5^{aad} Kulankiisa 15^{aad} ee 6^{da} Diseembar 2014:

Qodobka 1aad:

Iyada oo ay Golaha fadhiyeen 236 (Laba Boqol Sodon iyo Lix) Xildhibaan, waxaa codeyey 235 (Laba Boqol Sodon iyo Shan) Xildhibaan. Golaha Shacabku wuxuu mooshinka Kalsooni kala Noqoshada Xukuumadda ku meelmariyey aqlabiyada 153 (Boqol Konton iyo Saddex) Xildhibaan oo ayiday, 80 (Sideetan) Xildhibaan oo diiday iyo 2 (Laba) Xildhibaan oo ka aamustay.

Qodobka 2aad:

Sida uu qabo Qodobka 90aad ee Dastuurka Federaalka wuxuu Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya awood u siinayaa inuu kala diro Xukuumadda Federaalka haddii ay weydo codka kalsoonida Golaha Shacabka oo ah aqlabiyad fudud ka kooban (50%+1) tirada guud ee Golaha iyo in uu soo magacaabo Ra'iisal Wasaare cusubba waxay saaran tahay Madaxweynaha JFS

Qodobka 2aad:

Sida uu xeerinayo Qodobka 90(d) ee Dastuurka Federaalka, taniyo inta uu Madaxweynaha soo magacaabay lagana dhaarinayo Ra'iisal Wasaare iyo xubnaha cusub ee Golaha Wasiirada, waxaa xilka sii haynaya oo hawl-maalmeedka sii wadaya Ra'iisal Wasaaraha iyo Golaha Wasiirada kalsoonida lagala noqday, oo ahaanaya xukuumad xil-gaarsiin (caretaker government) sida ku cad Qodobka 103aad ee Dastuurka Federaalka.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

